

Sharciga Maarso 1971, lamba. 19

Wax ka baddalka Xeerka Nidaamaka Garsoorka.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu dhagaystay Golaha Xoghayeyaaha;
Marku arkay Qoraalka meelmarinta Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Iqtisaaska

Xeerka iqtisaaska ku cad qod. 2 Xerka Nidamka Garsoorka 1962 waxaa lagu dabbaqayaa dhammaan dacwadaha dhexmara muwaadiniinta Soomaliya iyo kuwa aan ahayn, waxaase shardi ah in ay degganyihiin Dalka.

Qod. 2

Qorista Jagada

1. Garsoorayasha cusub waxaa lagu qoraya tartan;
2. Tartanka waxaa ka soo qabgali kara muwaadiniinta haysta Shahaado jaamacadeed ee qaanuunka oo leh shaqsiyad qiyam-madanimoo ee waddaninimo oo dambi hore aan lahayn mid dambana ku socon;
3. Waxaa la qori karaa, marku laga qaado imtixaan hubin, saraakiisha dadwladada haddii ay haystaan Shahaada jaamacadeed ee qaanuunka;
4. Waqtiga kala guurka ama muddo aan ka badnayn laba sano marka uu xeerkaan dhaqangalo, waxaa loo oggolaan kara muwaadiniinta haysta dibloomo xagga sharciga;
5. Si ka baddalan faqradda koobaad ee qodobkaan, waxaa loo oggolaan karaa garsoorayaasha, tartan la'aan garsoorayaashi hore ee loo wareejiyay qayb kale oo ka tirsan Maamulka Dawladda oo iskood u keenay istiqaalad, waxaase shardi ah in ay sii haytaan anshax iyo qiyam – madani ee waddaninimo iyagoo aan dambi hore galin mid dambana ku socon.

Garsoorayaasha waxaa dib loo qori karaa shaqada haddii shaqada garsoorka dibadda ka joogin ugu badnaan shan sano.

Qod. 3

Horumarka Xilka

Iadoo la eegayo jagooyinka ka bannan tirada shaqalaha, horumarka xilka xaafiiska wuxuu ku imaanayaa imtixaan. Imtixaanka waxaa geli kara, kadib marka ay oggolaadaan Golaha Sare Adeegga Garsoorka:

- a) Garsoorayaasha haysta Shahaada jaamacadeed ee qaanunka oo ugu yaraan laba sano ka soo shaqeeyay qaybaha hoose;
- b) Garsoorayaasha haysta Dibloomo maaddooyinka sharciga oo ugu yaraan saddex sano ka soo shaqeeyay qaybaha hoose;
- c) Tixgalinta kor lagu soo sheegay tirada laguma darayo xaaladaha kasbashada gaarka.

Qod. 4
Oggolaashaha Imtixaanka

Oggolaashaha imtixaanka dallacaadda qaybaha Garsoorayaasha Gobolka sikastaba waxy ku xirntahay in la haysto ugu yaraan Diboloomo maaddada sharciga.

Oggolaashaha imtixaanada dallacaadda qaybaha Garsoorayaasha Racfaanka iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Sare waxay ku xirntahay haysashada Shahaada jammacadeed ee qaanuunka.

Qod. 5
Xil-Waayeelnimada

Xil-waayeelnimada imtixaanka looga qaygalayo, waxaa la xisaabinayaa sanooyinka shaqooyinka uu soo qabtay ka hor in aanu helin shahaadada waxbarashada la iska doonayo.

Qod. 6
Xeerka ku meel Gaarka ah

Qodobada lagu soo sheegay xeerkaan laguma dabbaqayo garsoorayaasha waqtiga xaadirka shaqaynaya kuaaso aan loo magacaabi karin in ay noqdaan Garsoorayaal Maxkamadda Sare haddii aanay haysan Shahaado jaamacadeed ee qaanuunka.

Qod. 7
Gelitaanga ayaa Dhaqan Galay

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu qoro Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 9 Maarso 1971.

Guddoomiyaha

Golaha Sare Kacaanka

Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayha Dawladda

Garsoorka iyo Arrimaha Shaqada

Prof. Cabdiqani Sheikh Axmed